

Dhaqdhaqaaqa Midigta-Fog - Talada loogu talagalay Magangalyo doonka iyo Qaxootida

Hordhac

Dalkan Ingiriiska (UK), waxaan jira koru-kaca xag-jirnimada midigta-fog iyo dhaqdhaqaaqa kooxaha raacsan fikirkooda. Xagjirnimada midigta fog waa cunsuri iyo Islaam nacayb dadka aaminsan ma ogola daka soo gala UK. Waxay bartilmaansadaan dadka madow (Black) iyo Ayshanka (Asian) ah iyo sidoo kale dadka ka soo jeeda dadka laga tirada badan yahay (Minorities), Muslimiinta, soogalootiga iyo dadka magangalyo ku ah UK.

Waxaan aragnay dhaq-dhaqaaqyo Midigta-Fog oo ka socda waddooyinka UK. Waxaa ka mid ah rabshado iyo beegsiga guryaha magangalyo-doonka iyo qaxootiga gaar ahaan xarumaha loo yaqaan (hotel accommodation).

Tani waxay ku lug lahayd kooxo weeraray hoteellada, oo adeegsada xeelado kala duwan si ay u maangaan hoteellada kuna faafiyaan been, nacayb iyo war khaldan oo ku saabsan qaxootiga iyo magangalyo-doonka gudaha UK. Dadkani waxay ku jiraan online iyo bulshada dhexdeeda.

Weeraradan ayaa ah kuwo aad looga naxo oo khatar badan. Waxaa muhiim ah in la ogaado in inkasta oo weerarradani ay yihiin kuwo aad u xun, dadkani waxay matalaan tiro yar oo UK ka jira. Aad bay u qaylo badan yihiin aad bayna u xanaaqsan yihiin, laakiin dadka UK intooda badan waxay rabaan inaad ammaan dareento oo halkan lagugu soo dhaweeyo.

Waxaad xaq u leedahay inaad dareento ammaan gurigaa iyo bulshada deegaankaaga. Waxa kale oo aad xaq u leedahay in aad nololshaada caadiga ah sii wadato. Qofna xaq uma laha inuu si xun kuula dhaqmo sababtoo ah sinjigaaga, isirkaaga ama diintaada. Balse waqtigan waxaa muhiim inaad taxaddar sameyso haddii aad dareento ammaan darro.

Macluumaad taageeraya ilaalada adiga iyo qoyskaaga

Dhaqdhaqaaqa Midig-Fog - Maxaan u fiirsadaa?

Dhaqdhaqaaqa Midigta-Fog wuxuu ku imaan karaa qaabab badan. Mararka qaarkood waa mid la soo habeeyo oo rabshado wata sida rabshadihii Agoosto 2024, oo ay adeegsadaan rabshado meelaha caamka ah si ay u ogaado. Marar kale waxay ku karaan inay qariyaan dhaqankooda. Waxaan ognahay inay adeegsadaan xeeladaha soo socda si ay u faafiyaan beenta, nacaybka iyo macluumaadka khaldan iyo cabsigelinta iyo cabsida.

- Mudaaharaadyo lagu qabto meelo caan ah oo magaaloooyinka ayagoo wata calanka Ingiriiska, kuna qaylinaya aflagaado cunsuriyad ah iyo hanjabaad
- In mudaharaadyo lagu qabto xarumaha magangayo-doonka la dejiyo, ayagoo wata boorar oo buuq abuuraya, mararka qaarkoodna isku dayaya inay waxyeelo u geystaan hantida dadka
- Inay booqdaan hoteellada ay qaxootiga iyo magangelyo-doonku ku nool yihiin si ay filimaan uga sameeyaan
- Iskuday inay galaan hudheellada si aan la oggolayn oo filim duubaan, ama ay la hadlaan dadka goobtaa degan
- Qaylo xadgudub iyo cunsuriyad ah
- Hanjabaadyo rabshadeed oo loo geysanayo ururada bixiya taageerada magangalyo-doonka iyo qaxootiga

Dhammaan xeeladahaas waxaa loo adeegsadaa in lagu cabsi geliyo loona abuuro dareen xun iyo cabsi ku saabsan qaxootiga iyo magangalyo-doonka bulshada maxalliga ah iyo in lagu faafiyo baraha bulshada.

Mararka qaarkood, dibad-baxayaasha garabka midig ee fog waxay u muuqan karaan kuwo saaxiibtinimo leh haddii ay u maleeyaan in tani ay ka caawin karto inay idiin soo dhawaadaan adiga, qoyskaaga, ama gurigaaga si ay u helaan filim fiican. Balse mararka qaarkoodna, waxay noqon karaan kuwo cadhaysan oo ku cabsi galinaya.

Ka digtoonow dadka sheeganaya inay yihiin suxufiyiin. Waa xaqaaga inaad la hadasho qof kasta oo aad rabto, balse dadka qaar ayaa iska dhiga suxufiyiin si ay u helaan muuqaalo ay baraha bulshada ku wadaagaan. Haddii aad rabto inaad la hadasho suxufi oo aad uga sheekeyso wixii ku soo maray, hay'addaada deegaankaaga ee magangalyo-doonka ama qaxootiga ayaa ku caawin kari.

Ka digtoonow qoraaladaaga baraha bulshada ee muujinaya goobta aad joogto. Gaar ahaan xilliyada ay jiraan waxqabadyo midigta fog. Dadka ku jira midigta fog waxay si dhow u la socdaan kanaalada baraha bulshada si ay u ururiyaan macluumaad ku saabsan halka dadku joogaan iyo waxa ka dhacaya goobaha gaarka ah.

Booliska

Mararka qaar la hadalka booliska waa laga cabsan karaa. Dalkan UK, boolisku waxay waajib ku leeyihiin inay ku ilaaliyaan oo ay ku badbaadiyaan. Haddii aadan ku hadlin Ingiriis balse aad u baahan tahay inaad la hadasho booliska, waad weydiisan kartaa inay kuu diyaariyaan turjubaan. Mar walba waa inay taas sameeyaan marka aad codsato. Ma ahan inaad adigu raadiso turjubaan kuu gaar ah. Dalkan UK, jinsiyaddaada, midabkaaga iyo diintaada dhammaantood waa astaamo la ilaaliyo

sida ku cad Sharciga UK. Waxaad xaq u leedahay in boolisku kuula dhaqmaan si xushmad leh oo ay ku caawiyaan inaad ammaan dareentid.

Xusuusnow:

Deg-deg – markuu dembi dhacayo ama markuu qof halis ku jiro xilligaas: Wac 999. Marka lagaa qabto wicitaanka, u sheeg in aad booliska u baahan tahay. Haddii uusan ahayn xaalad deg-deg ah – qofna uusan xilligaas halis ku jirin, balse aad rabto inaad soo sheegto dembi ama aad macluumaad siiso booliska: Wac 101.

Maxaan sameeyaa haddii aan u maleynayo in ay jirto khatar ka timid falalka Midigta-Fog halka aan ku noolahay?

WAX KA OGOW

1. Waydii dadka aad ku kalsoon tahay ee bulshadaada ku saabsan wixii khataro ah oo dhawaan dhacay. Tani waxaa ku jiri kara haddii ay jiraan weerarro ama hanjabaado la xiriira mudaaharaadyo deegaanka ka dhacay. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad qaadato go'aanno wanaagsan oo ku saabsan meelaha amniga ah iyo meelaha ay tahay inaad ka fogaato waqtiyada qaarkood.
2. Kala hadal dadka kale ee aad taqaanid, shaqaalaha guryaha aad ku nooshahay, kuwa bixiya adeegyada hoyga, hay'adaha samafalka ama kooxaha deegaanka ee aad ka mid tahay si aad u hubiso inaad haysato xogta ugu dambeysay.
3. Fiiro gaar ah u yeelo wax kasta oo u muuqda in aan caadi ahayn ama wax aan ku habboonayn oo agagaarka gurigaaga ka socda. Haddii aad aragto ama maqasho wax shaki gelinaya, kalsooni ku qabso dareenkaaga kuna soo warbixi walaacaaga booliiska ama shaqaalaha hoyga isla markiiba.

FIIRI

Ka hor intaadan bixin:

1. Hubi in bateriga telefoonkaaga uu si buuxda u dallacan yahay iyo inaad kaydsatay lambarrada muhiimka ah.
2. Dadka ogeysii halka aad u socoto iyo waqtiga aad filayso inaad soo noqoto (saaxiib ama xubin qoyskaaga ka tirsan). Waxay hubin karaan ama qof kale u sheegi karaan haddii aadan la xiriiri karin.
3. Haddii aad saxeexo markaad ka baxeyso ama soo galayso meesha aad daggan tahay - hubi inaad sidaas sameyso.

4. Ka fiirso in laga yaabo inay ka wanaagsan tahay inaad baxdo adigoo qof kale la socda, halkii aad kaligaa bixi lahayd.

Markaad banaanka joogto:

1. DIGTOONOW & FEEJIGNOW – hubi inaad ka warqabto deegaankaaga markaad ka baxdo meesha aad daggan tahay iyo markaad banaanka joogto. Haddii aad u maleyso in amnigaaga uu khatar ku jiro waqti kasta, wac booliska lambarka 999.
2. Isku day inaad joogto meelaha iftiinka leh iyo goobaha dadweynaha.
3. Isku day inaad isticmaasho waddooyin kala duwan markaad aado ama ka soo noqoto meelaha aad si joogto ah u booqato.
4. Haddii qof ku soo dhawaado oo aad u maleyneyso inuu ku lug leeyahay waxqabadka midigta-fog – ha la hadlin. Sida ugu dhaqsaha badan u tag meel dadweyne ah oo ammaan ah. Waxaad ka codsan kartaa caawimaad dadka ku sugan dhismayaasha dadweynaha sida maktabadaha ama saldhigyada booliska ama dukaamada. Wac booliska ama ka codso qof kale inuu kuu waco.
5. Haddii qof ku soo dhawaado isagoo wata kamarad ama isku dayaya inuu ku duubo taleefan - iska tag oo ha u jawaabin ama ha la hadlin. Sida ugu dhaqsaha badan u tag meel dadweyne ah oo ammaan ah oo wac booliska lambarka 999.

Maxaan sameeyaa haddii Midigta-Fog ay weeraraan gurigayga?

Haddii aad ku nooshahay hotel:

1. **Raac tilmaamaha shaqaalaha ku sugan goobta.** Waxay kaashan doonaan Booliiska iyo Xafiiska Arrimaha Gudaha si ay kuu badbaadiyaan. Tani waxay ku lug yeelan kartaa in si deg-deg ah laguugu wareejiyo goob kale.
2. Hubi in shaqaalaha adeeg bixiyaha hoyga ay ogyihiin meesha aad joogto adigoo iska diiwaangelinaya xafiiska soo dhawaynta. Hayso telefoonkaaga oo lacag ku filan ku jirto.

Haddii aad ku nooshahay guri bulsho:

1. Booliiska wac isla markiiba adigoo garaacaya 999 kuna wargeli in gurigaaga la weeraray. Warbixi wixii cunsuriyad ah ee lagu yiraahdo.
2. Haddii aad awoodid, wac shaqaalaha guryaha kuna wargeli waxa dhacaya.
3. Ka raadi meesha ugu badbaado badan ee gurigaaga inaad sugtid. Isku day inaad hesho qol aan lahayn daaqado ama leh masaafa ku filan oo ka fog

daaqadaha si looga ilaaliyo soo gelid ama jabin. Meelahan waxaa fiican in laga xiro gudaha waxaana wanaagsan inay leeyihiin waddooyin cad oo aan xidhmin oo laga baxsado.

Maxaan sameeyaa haddii aan ka baxsanahay hoygayga, oo aan helo war sheegaya in hawlo midigta fog laga wado hoteelkayga ama gurigayga?

- 1. Ha u laaban hotelkaaga ama gurigaaga ilaa laguugu sheego in ay tahay mid ammaan ah inaad ku noqoto.**
2. Raadi meel dadweyne oo ammaan ah inaad sugtid, ama la joog saaxiib, oo sug warbixin dheeraad ah oo ka timaadda shaqaalaha guryaha.
3. Haddii aad hesho farrin qoraal ah ama wicitaan ka yimaadda hotelkaaga ama bixiyahaaga guryaha oo ku saabsan dhacdo ka dhacday hotelka, markaas u sheeg in aad banaanka joogtid hotelka. Hubi inay hayaan nambarkaaga telefoonka.
4. Bixiyahaaga hoyga ama hotelka ayaa ku siin doona warar cusub oo la xiriira tallaabada xigta, waxaana ku ogeysiin doona marka ay tahay nabad inaad ku noqoto.